## SUURAT AT-TAKWIIR:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

1. *Marka qorraxda la duubo ( Qiyaamada )*
2. *Xiddiguhuna daataan ( iyagoo madow )*
3. *Buurahana la kexeeyo ( la rujiyo )*
4. *Geelii rimmanaana la halleeyo*
5. *Dugaaggana la kulmiyo ( Qisaas darteed )*
6. *Badahana la kululeeyo*
7. *Naf walbana jidhkeedii lagu lammaaneeyo*
8. *Gabdhihii la xabaalnololiyayna la warsado*
9. *Maxaa dambi ah oo loo dilay*
10. *Kutubta ( camalkana ) la fidiyo*
11. *Samadana la rujiyo*
12. *Naarta Jaxiimana la huriyo*
13. *Jannadana la dhaweeyo*
14. *Waxay ogaan nafu waxay camal fashay*

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***
Eebe isagaa wax walba abuuray, wuxuu doonana wuu falaa, Qiyaamadu markay imaanna wuxuu muujin calaamooyiin iyado ruux walba Eebe tusin wuxuu Adduunka ku camal falay, kana abaal-marin khayr iyo sharba.
Abuu Hurrayah wuxuu ka wariyay Nabiga “ Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee “ : Qorraxda iyo Dayaxa waa la duubi Maalinta Qiyaame.

*15. Waxaan ku dhaartay “ buu Eebe yidhi “ Xiddigaha qarsooma ( Maalintii )*

*16. Ee socda iftiinka Qorraxdana ku qarsooma*

*17. Iyo habeenku marku jeedsado*

*18. Iyo subaxu markuu soo qaabilo*

*19. Ee Quraanku waa hadalka Eebe, Soona raray Malag Sharaf leh*

*20. Xoogna leh Eebe agtiisana Daraja ku leh*

*21. Laguna addeeco halkaas aaminna ah*

*22. Saaxiibkiinna ( Nabiguna ) ma aha ku waalan*

*23. Horaybuuna ugu arkay Jibriil Jahadii Caddayd ( Bariga Makka )*

*24. Nabiguna ma aha ruux lugu shakiyo waxa maqan*

*25. Quraankuna ma aha hadal shaydaan la fogeeyay*

*26. Ee xaggeed gaalooy aadaysaan*

*27. Quraankuna waxaan waanada caalamka ahayn ma aha ( waa waano )*

*28. Ruuxii doona inuu toosnaado ( yuuna u yahay )*

*29. Waxna ma dooni kartaan in Eebaha Caalamku doona mooyee.*

Qur’an 81:1-29

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***
Xiddigaha iyo khalqiga kalaba dhammaantiis Eebaa abuuray, wuxuuna Eebe ugu dhaartay qiimohooda iyo say wax la yaab leh u yihiin, Quraankuna waa hadalkii Eebe ee u malaku Jibriil u soo dhiibay si uu Nabiga Muxammad ah “ Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee “ u gaadhsiiyo, isna caalamka u gudbiyo, waxaana lagu yaqaan Nabiga ammaano, run, caqli iyo

gaadhsiin xaq sida Nabiyada kaleba. Markay soo dagtay Aayaddan: ( Ruuxiinnii doona inuu toosnaado ) yuu Abuu Jahal yidhi: Amarka annigaa iska leh. haddaan doonno waan toosnaanhaynaa, haddaan doonnana ma toosnaanhayno, markaasaa Eebe soo dajiyay kor ahaaye ( Wax ma dooni kartaan in Eebaha Caalmaku doono mooyeen )